

Xuquuqdaada markaad kireysanaysid: Xuquuqda Aadanaha ee Alberta

Guriyeynta waayeelka: Guryaha lagu xanaaneeyo

Ku noolaanshaha guryaha kalkaalinta

Guri xanaaneed waa meel ay ku noolyihiin dadka waayeelka oo leh baahiyo caafimaad oo culus, halkaasoo ay haystaan 24-saacadood oo ay ka heli karaan kalkaaliso diiwaangashan. Sharciga Guryaha Kalkaalisa ayaa kuu sheegaya shuruucda guryaha xanaanaynta ee ka shaqeya Alberta.

Maxaad ka ogtahay Sharciga Guryaha Daryeelka Xanaanada:

- Waxay xaddideysaa lacagta inta ugu badan ee lagu soo dallaci karo si loogu noolaado guryaha xanaanada
- Waxay xaq u siineysaa dadka waayeelka ah hoyga aasaasiga ah iyo cuntooyinka, iyo daawooyinka sida uu dhakhtarku qoray, iyo adeegyada daryeelka shakhsi ahaaneed haddii ay ku nool yihiin guryaha xanaanada
- Waxaad u baahan tahay guryaha xanaanada si aad ula socoto hantida gaarka ah ee waayeelka ah oo ay ku jirto lacagtu
- Waxay u baahan tahay dhammaan guryaha xanaanadu inay la kulmaan Heerarka hoy-siinta daryeelka ee Muddada Dheer iyo sii socoshada Heerarka adeegyada Daryeelka Caafimaadka Dheeraadka ah ee ay dejisay Xukuumadda Alberta

Markaad codsato inaad ku noolaato guriga xanaanada, waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad keento dukumiintiyada sida:

- Awoodda Qareenka Dhaqaalaha (haddii uu jiro hal qof)
- Awoodda Qareenka Daryeelka Shakhsiga (haddii uu jiro hal qof)
- Ogeysiiska qiimeynta sannadki hore
- Tilmaamaha Fidsan ee Daryeelka Caafimaadkii Hore
- Lambarka Qorshaha Caymiska Caafimaadka ee Alberta
- Lambarka Caymiska Bulshada

Haddii lagu ogolaado guriga xanaanada, waxaad haysataa 5 maalmood inaad isticmaasho sariirta loo qoondeeyey ama haddii kale waxaa laga yaabaa in la siiyo qof kale.

Haddii aad ku nooshahay guriga xanaanada, guddi ayaa go'aamin doona haddii aad rabto inaad ku noolaato iyo hadii aanad rabin ba.

Mararka qaarkood, ereyga "xarun ku nool" waxaa loo isticmaali karaa in lagu sharaxo dadka waaweyn ee ku nool guryaha xannaaneynta ama meel kale oo daryeel waqti dheer ah.

Waxaa jira nidaamyada rafcaan oo loo heli karo guryaha xanaanada waayeelka:

- Haddii codsigaaga aad ku nooshahay guryaha Xanaanada la joojiyo, waxaad rafcaan u diri kartaa Guddiga Degmada.
- Haddii aad ku nooshahay guriga xanaanada, waxaad rafcaan u sameyn kartaa go'aanka sarkaalka cabashada.
- Haddii codsigaaga ku noolaanshaha guriga xanaanada la joojiyo ama rafcaanka aad ku guuldaraysato, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Daryeelka Guriga si adeegyo kale oo la heli karo oo ku habboon baahiyahaaga laguugu raadiyo.

Haddii aad ka welwelsan tahay xad-gudub ama badqabka waayeelka ee guryaha xanaanada:

La xariir dadka ku jira ilaalinta daryeelka
Wac si bilaash ah (gobolka oo dhan): 1.888.357.9339

Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahad celino haweenka kanadiyaanka Soomaalida iyo ururka caruurta ee nala wadaagaya anaga mashruucan.



"Right Now, one woman at a time"

Waa inaad ku tiirsanayn daabacaddaan talobixin sharciyeed. Waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan sharciga Alberta oo keliya.

Daabacaaddani waxay qiraysaa maalgelinta ay bixiso Alberta ee Waxbarashada Xuquuqda Aadanaha iyo Sanduuqa maal-gelinta Dhaqamada kala duwan.



Human Rights
Education and
Multiculturalism
Fund

Centre for
Public
cplea
Legal Education
Alberta

© June 2018, Legal Resource Centre of Alberta Ltd.
Operating as: Centre for Public Legal Education Alberta

www.cplea.ca